**Xeerka  fayadhowrka iyo Ganaaxyada   Degmada Qardho**

**Hordhac**

**Tusmada Xeerka**

Table of Contents

**Qodabka 1aad Wacyi gelin .......................................................................2**

**Qodabka 2aad Digniin ..............................................................................3**

**Qodabka 3aad Qaabka loo maraayo shati-siinta Goobaha cuntooyinka iyo goobaha la xiriira Caafimaadka Bulshada .......................................................3**

**Qodabka 4aad Shuruudaha Caafimaad ee looga Baahan yahay Shaqaalaha ...4**

**Qodabka 5aad Shuruudaha caafimaad ee looga baahanyahay Goobaha cuntada iyo Goobaha la xiriira Caafimaadka Bulshada .....................................5**

**Qodobka 6aad Fayadhawka iyo Nadaafada Kalluunka ......................................6**

**Qodabka 7aad Fayadhawka iyo Nadaafadda Malabka iyo Khudaarta .............7**

**Qodabka 8aad Fayadhawka iyo Nadaafadda Biyaha .........................................7**

**Qodabka 9aad Fayadhawka iyo Nadaafadda Raashinka iyo Cabitaanka .........8**

**Qodabka 10aad Fayadhawka iyo Nadaafadda Makhaayadaha iyo Kafateeriyooyinka ..........................................................................................8**

**Qodobka 11aad Fayadhawka iyo Nadaafadda Furinka Rootiga iyo Macmacaanka..........................................................................................9**

**Qodobka 12aad Fayadhawka iyo Nadaafadda Timajarayaasha .......................10**

**Qodobka 13aad Fayadhawka iyo Nadaafadda Xaruumaha Isqurxinta iyo saaloonada Dumarka ..........................................................................11**

**Qodobka 14aad Fayadhawka iyo Nadaafadda Doobiga ....................................12**
**Qodobka 15aad Fayadhawka iyo Nadaafadda Suburmaarkita........................12**
**Qodobka 16aad Fayadhawrka wadooyinka iyo ku dhaqashada baaburta......13**
**Qodobka 17aad Fayadhawrka wadooyinka xeebta** Error! Bookmark not defined.
**Qodobka 18aad Kororka Ganaaxa ...................................................................14**
**18.1 Ganaaxa Qodobkaan.........................................................................14**
**18.2 Qodobka 19 aad Maareynta Musqulaha iyo Qashinka Daawooyinka ……………….17**
**Qodobka 20 aad Dhaqan galka xeerkaan...........................................................15**

## Qodabka 1aad

### Wacyi gelin

Si loo kasbado dhamaan qaybaha kala duwan ee bulshada waa in la sameeyo

1.1 -wacyi gelin joogta ah oo Bulshada lagu gaarsiinayo xeerka faya-Dhawrka, iyada oo la isticmaalayo Aaladaha kala duwan sida, raadiyaha, Taleefashinka, Joornaalada, bogaga internetka, SMS iyo IWM.

1.2 Waaxda arimaha bulshada ayadoo kaashanaysa madaxa fayadhowrka degmada waa in ay qabataa kulamo wacyi gelin ah oo bulshada lagula wadaagaayo xeerka fayadhowrka degmada.

## Qodabka 2aad

**Digniin**

Waxaa waajib ah in la siiyo digniin muwaadinka si uu khaladkiisa u saxo iyadoo loo marayo qaab sharci ah oo qoran: -

2.1. Qofka waa in la siiyo digniin qoraal ah, loona diiwaangeliyo, lagana saxiixo in ay gaartay digniintaas.

2.2. Digniintiisu waa hal mar oo lagu ogaanaayo qofku in uu isbedel keenay iyo in uu falkii weli waddo

2.3 Dhamaan digniinaha la siimaayo muwaadiniinta ku xadkudbay xeerka ama khaladka galay waa in laga hayaa nuqulo qoraal ah oo cadaynaaya in muwaadinka la gaarsiiyey digniinta

## Qodabka 3aad

**Qaabka loo marayo shati-siinta Goobaha cuntooyinka iyo goobaha la xiriira Caafimaadka Bulshada**

Sida sharciga Dowliga ah waxaa shati bixinta iska leh waaxda Dakhliga, waxayna siin kartaa qofkii ogalaansho ka haysta Xafiiska Fayadhowrka Degmada.

Goob kasta oo ganacsi ah oo la furayo mulkiilaha ama masuulku waa: -

3.1. in uu keeno sawirka goobta iyo bedka ay ku fadhido meesha uu rabo shati siinta,

3.2. Laba goobood oo kala go.an mawada isticmaali karaan hal shati iyo hal Kaar.

3.3 qofku waa in uu buuxsho dhamaan sharuudaha looga baahan yahay, inta uusan qaadan shatiga iyo kaarka aqoonsiga Fayadhawrka.

3.4. dhamaan Goobaha Ganacsiga sida Maqaaxiyaha, Hoteelada, Suuqyada Qudrada, Tima jarayaasha, Gayrashyada, labaajooyinka, Doobilayaasha,

Foornooyinka, Warshadaha, Meelaha lagu qurxiyo Dumarka, Farmashiyaasha, Bakhaaradda Raashinka, Kawaanada Hilibka iyo Kaluunka waa inay qaataan Kaarka Aqoonsiga Fayadhawrka si loo ogaado badqabka Caafimaadkooda.

3.5. Shaqaalaha ka shaqeeya goobaha ganacsiga ee ku cad qodobka kor ku xusan ee 3.4 waa in baarid Caafimaad lagu Sameeyo lixdii biloodo ee kasta si loola socdo heerkooda Caafimaad.

## Qodabka 4aad

**Shuruudaha Caafimaad ee looga Baahan yahay Shaqaalaha**

4.1 qofkasta oo shaqaale ah waa in uu haystaa kaarka aqoonsiga Cafimaadka.

4.2 shaqaale kasta oo ka shaqeeya Goobaha Ganacsiga ee bulshada loogu adeego waa in uu buuxiyaa dhamaan sharuudaha Nadaafadeed ee looga baahan yahay.

4.3 Waxaa reeban in aan lagu isticmaali Karin wax maandooriye ah dhamaan Goobaha ganacsiga ee bulshadu ka adeegato.

4.4 shaqaalaha ka shaqeeya goobaha bulshadu iskugu timaado in ay lee yihiin labis u gaara oo ay kaga duwan yihiin dadka.

4.5 waxaa ka reeban dadka ka shaqeeya goobaha Cunooyinka iyo Cabtitaanadda in xiliga shaqada aysan xiran Karin Jijimaha, Dahabka, Caagaga iyo Biraha gacmaha la gashado.

4.6 Kama shaqayn karo qof ay ka muuqato astaamaha Cuduradda Faafa.

4.7 waxaa waajib in ay shaqaalahu xirtaan galoofyada badbaadsan ee la isticmaalo halka mar xiliga shaqada diyaarinta cuntooyinka bisil, khutrada iyo macmacaanada.

4.8 Cidkasta oo aan buuxin sharuudaha Cafimaadka waxaa lagala laabanaya Kaarka aqoonsiga Cafimaadka.

4.13 Shaqaalihii u hogaasami waaya shuruudaha caafimaad ee looga baahanyahay waxaa lagu qaadayaa xeerka ganaaxa fayadhowrka oo ah sidatan **($30) hadii uu ku noqdo ganaaxu waxa uu noqonayaa ($60).**

## Qodabka 5aad

**Shuruudaha caafimaad ee looga baahanyahay Goobaha cuntada iyo Goobaha la xiriira Caafimaadka Bulshada**

Goobaha loogu tala galay in lagu fuliyo hawlo la xiriira caafimaadka guud ee bulshada waa in ay noqdaan kuwo si heer sare loo diyaariyay oo ah sidan:

5.1 Goobaha Ganacsi ee cuntooyinka iyo cabitaanadda waa in ay lee yihiin godod lagu shubo Wasakhda dareeraha ah, lee yihiina meel ay booyadaha wasakhdu ka jiidi karaan.

5.2 Dhismahu waa in ay ku samaysan yahay dhagax ama bulukeeti ama wax u dhigma isla mar ahaantana aanay lahayn dildillaac si looga badbaado ku dhuumashada qaybaha kala duwan ee cayaayaanka, sidoo kale Waa in qaybta hoose (dhulka) ay ka samaysan tahay sibidh ama mar-mar aan biyo nuugin.

5.4 waa in ay leedahay iftiin ku filan gudo iyo dibad ba iyo Hawo ku filan sidoo kale in ay leedahay suuliyaal iyo meelo gacmaha lagu dhaqdo oo agabkoodu u dhamaystiran yahay.

5.5 Waa in ay leedahay goobtu meelo loogu talo galay in lagu ururiyo qashinka loona isticmaalo kiishash afka laga xidhay.

5.6 Waxaa ka mamnuuc ah goobta in lagu isticmaalo wax ka gedisan wixii shatiga loo siiyey.

5.7 waa in ay leedahay goobtu sanduuqa gargaarka deg-dega ah oo dhamaystiran iyo dabdamis.

5.8 waa in ay leedahay goobtu tallaagad wax qaboojisa oo lagu rido wax kasta oo u baahan in la qaboojiyo.

5.9 Haddii goobta lagu isticmaalo dhuxul si wax loogu kariyo, waa in ay dhuxushu leedahay qol u gooni ah si toos ahna looma furi karo ilaa marka loo baahdo ma ahee.

5.10 Goobtii u hogaasami wayda shuruudaha caafimaad ee looga baahanyahay waxaa lagu gaanaxayaa **($30) hadii uu ku noqdo ganaaxu waxa uu noqonayaa ($60).**

5.11 Dhamaan Goobaha Cafimaadka ee geeya Dawooyinka dhacay ama la isticmaalay haragooda meeshii loo asteeyay meelo ka baxsan waxaa laga qaadaya ganaax dhan **$200**, hadii **uu ku noqdo ganaaxu waxa uu noqonayaa $300.**

## Qodobka 6aad

**Nadaafada Hilibka iyo Kalluunka.**

6.1 Hilibka waxaa lagu qali karaa Kawaanada ay dowladdu u asteysay ee haysta shatiga ganacsiga Dowladda, cidii meel ka baxsan ku qasha meelaha loo asteeyay waxaa laga qaadaya ganaax dhan **$30, hadii uu ku noqdo ganaaxu waxa uu noqonayaa ($60).**

6.2 Waa in lagu dhaqaa biyo ku filan oo lagu nadiifiyo kalluunka marka la qalo laguna ridaa meel nadiif ah oo ku habboon (**Qodabkaan ganaaxiisu waa $30 hadii uu ku noqdo ganaaxu waxa uu noqonayaa ($60).**

6.3 Neef aysan Dowladda Hoose calaamad lahayn, Lana hubin badqabkiisa caafimaad laama qali karo, cidii qashana waxaa lagu ganaxayaa **$10 hadii uu ku noqdo ganaaxu waxa uu noqonayaa $15).**

6.5 Kaluunka waa in loo isticmaalo Saliid nadiif iyo agab nadiif ah, waxaana reeban in lagu duubo Joornaal, qofkii fulin waaya waxaa lagu ganaxayaa **$5 hadii uu ku noqdo ganaaxu waxa uu noqonayaa 10).**

## Qodabka 7aad

**Fayadhawka iyo Nadaafadda Khudaarta**

7.1 Dhamaan dalagyada miraha kala duwan ee beeraha ka soo go’a waa in la nadiifiyaa, lagana saaro wixii buka, marka la suuqgaynayo, qofkii lagu qabtana waxaa lagu qaadaya ganaax dhan **$5 hadii uu ku noqdo ganaaxu waxa uu noqonayaa 10).**

7.2 sharaabka, Cabitaanadda, Caanaha subaga saliida iyo malabka cidkasta oo dhalan rog ku samaysa waxaa lagu qaadayaa ganaax dhan **$30hadii uu ku noqdo ganaaxu waxa uu noqonayaa $60).**

## Qodabka 8aad

**Fayadhawka iyo Nadaafadda Biyaha.**

8.1 Ceelasha waaweyn, kuwa yaryar iyo barkadaha waa in lagu shubaa kalooriin qiyaasan si looga hortago cuddurada biyaha ka dhasha ayna ka daboolan yihiin dusha sare cidii fulin wayda waxaa lagu qaadaya **$ 10 hadii uu ku noqdo ganaaxu waxa uu noqonayaa $20**.

## Qodabka 9aad

**Badeecada wakhtigeedii dhowyahay ama dhaaftay.**

9.1 Badeecadu waa in ayleedahay taariikhda soo saarka iyo tariikhda dhicista sidoo kale waxaa reeban in bulshada laga gado badeeco dhacday, cidii lagu helo waxaa lagu ganaxayaa **$200 hadii uu ku noqdo ganaaxu waxa uu noqonayaa $400).**

## Qodabka 10aad.

**fayadhowrka Makhaayadaha iyo Kafateeriyooyinka.**

10.1 Baarka iyo kafateeriyada waa in ay leeyihiin qolka keydka ee cuntada (mid la qaboojiyay iyo mid heer kulka qolka loo daayayba) welibana laga taxdaray nadaafada, Waa in ay leeyihiin jiko ama kushiin lagu koriyo cuntada oo nadiif ah, Waa in ay leyihiin meel lagu diyaariyo cuntada la kariyay, Waa in ay leeyihiin meel gacmaha lagu dhaqo oo nadiif ah lehna saabuun iyo biyo nadiif ah oo ku filan intaas meshii laga waayo waxaa lagu ganaxayaa **$30 hadii uu ku noqdo ganaaxu waxa uu noqonayaa $60).**

10.2 Waa in ay leedahay hool lagu siiyo macaamiisha cuntada oo nadiif ah kana diyaarsan dhan kasta, Miisaska iyo kuraasta waa in ay ahaadaan kuwo nadiif ah marwalba cidii kasta oo lagu qabto waxaa lagu ganaxayaa **$30 hadii uu ku noqdo ganaaxu waxa uu noqonayaa $60).**

10.3 Waxaa reebban in joornaalada loo isticmaalo in gacmaha la isaga tirtiro, waxaa loo isticmaali karaa gacmo tirtiridda warqado cadcad oo nadiif ah,

Weelka waxlagu cunayo ama lagu cabaayo waa in uu san lahayn jajab ama kuus-kuus cidii lagu helo waxaa lagu ganaxayaa **$10hadii uu ku noqdo ganaaxu waxa uu noqonayaa $20.**

## Qodobka 11aad

**Fayadhowrka Rootiga iyo Macmacaanka**

11.1 Waa in ay leedahay warshada Rootigu meel lagu diyaariyo cajiinka oo nadiif ah lagana taxadaro taariikhda dhicitaanka walxaha loo adeegsado cajiinka, sidoo kale waa in uu leeyahay meel lagu kaydiyo cajiinka, meel lagu diyaariyo iyo meel kale oo dadka lagaga iibiyo oo dhammaantoodna nadaafaddoodu ay aad u sarayso, qofkii lagu helo waxaa lagu ganaxayaa **$10hadii uu ku noqdo ganaaxu waxa uu noqonayaa $20).**

11.2 Qolka lagu sameeyo rootiga iyo macmacaanka waa in uu leeyahay marwaxado ka saara kulka iyo qiiqa, si loo ilaaliyo badqabka Caafimaad ee shaqalaha, goobtii lagu helo waxaa lagu ganaxayaa **$10hadii uu ku noqdo ganaaxu waxa uu noqonayaa $20).**

11.3 Waa in rootiga iyo Macmacaanka lagu gadaa, laguna qadaa shay nadiif ah oo daboolan, qofkii aan ku qaadin ama ku gadin waxaa lagu ganaxayaa **$5 hadii uu ku noqdo ganaaxu waxa uu noqonayaa $10).**

## Qodobka 12aad

**Nadaafadda Timajarayaasha.**

12.1 Tima jaruhu waa in uu leeyahay khaanado loogu talo galay in qalabka lagu guro iyo muraayado ku filan goobta, goobtii laga waayo waxaa lagu gaxanayaa **$10, hadii uu ku noqdo ganaaxu waxa uu noqonayaa $20).**

12.2 Waa in uu leeyahay meel ku filan oo lagu dhaqo madaxa, gacmaha iyo qalabkaba ayna leedahay biyo Nadiif ah oo ku habboon iyo maadooyin wax lagu nadiifiyo oo wanaagsan, goobtii laga waayana waxaa lagu ganaxayaa **$10, hadii uu ku noqdo ganaaxu waxa uu noqonayaa $20).**

12.3 In uu leeyahay qalab ku filan oo wax lagu xiiro ama wax lagu jaro ayna sahlan tahay nadiifinatiisu aanu daxlin, sidoo kale waa in qalabka loo isticmaalo geermis dile, goobtii laga waayo waxaa lagu ganaxayaa **$10, hadii uu ku noqdo ganaaxu waxa uu noqonayaa $20)**

12.4 waa in qofkasta oo adeeg loo samaynayo uu helaa qalab dhamays tiran sid maro nadiif ah, suufka dhegaha iyo qalab laga dilay Jeermiska, goobtii laga waayana waxaa lagu ganaxayaa **$5 hadii uu ku noqdo ganaaxu waxa uu noqonayaa $10).**

12.5 Waxaa reebban in gabadh ka shaqayso timajare raga u gaar ah (**Qodabkaan ganaaxiisu waa $10 hadii uu ku noqdo ganaaxu waxa uu noqonayaa $20.**

12.6 Waa in uu ahaadaa timajaruhu goob nadiif ah, markastana la xaaqo, Waa in qashinka ka soo baxa timajaraha lagu ururiyaa meel gooni ah oo lagana taxadaro, goobtii lagu helo waxaa lagu ganaxayaa **$5, hadii uu ku noqdo ganaaxu waxa uu noqonayaa $10).**

**12.7** tima jarihii lagu qabto isagoo si fool xun timaha u jaraya waxaa lagu ganaxayaa isaga iyo qofka uu u jarayo $20.

**12.8** Tima jarihii timaha ka soo baxay goobtiisa shaqo aan ku wareejin shirshadda nadaafadda degmada wuxuu mutaysanaaya ganaax dhan $ 40

**Qodobka 13aad.**

**Xaruumaha Isqurxinta iyo saaloonada Dumarka.**

13.1 Waa in shaqaalahu xidhtaan dharka shaqada ayna ilaaliyaan nadaafaddiisa, lagana taxadaraa naadafadda goobta, qofkii intaas laga waayo waxaa lagu ganaxaya **$5 hadii uu ku noqdo ganaaxu waxa uu noqonayaa $10).**

13.2 Shaqaalaha xurinta isqurinta iyo saaloonada waa in ay gacmahooda dhaqaan oo nadiifiyaan inta aysan bilaabin shaqada, qalabka ay u isticmaalayaan waa inuu yahay mid nadiif ah. qofkii intaas laga waayo waxaa lagu ganaxaya **$5, hadii uu ku noqdo ganaaxu waxa uu noqonayaa $10).**

13.3 Waxaa reebban in raggu ka shaqeeyo xaruumaha isqurxinta iyo saaloonada dumarka (**Qodabkaan ganaaxiisu waa $5 hadii uu ku noqdo ganaaxu waxa uu noqonayaa $10).**

13.4 Waa in loo isticmaalo maadooyin wax lagu nadiifiyo si jeermiska iyo bakteeriyada looga dilo qalabka shaqada, sidoo kale waa waa inay jiraan shukumaano wax lagu qallajiyo oo ku filan. Xaruntii intaas laga waayo waxaa lagu ganaxaya **$5, hadii uu ku noqdo ganaaxu waxa uu noqonayaa $10).**

13.5 laguma isticmaali karo wax maandooriya ah xarunta isqurxinta dhexdeeda sidoo kale wax cunto ah laguma dhex samayn karo, xarunti lagu helo waxaa lagu ganaxayaa **$5, hadii uu ku noqdo ganaaxu waxa uu noqonayaa $10).**

## Qodobka 14aad

**Nadaafadda Doobiga.**

14.1 Doobbiga ama dhar-dhaqaha waa in uu leeyahay meel uu dharka ku qaabilo oo uu kaga guddoomo dadka uu u adeegayo, qofkii aan lahayn waxaa lagu gaxanayaa **$5, hadii uu ku noqdo ganaaxu waxa uu noqonayaa $10.**

14.2 Waa in uu leeyahay meel uu ku xifdiyo dharka uu dhaqay, Qof kastana dharkiisa gooni ugu dhaqo, qofkii aan lahayn waxaa lagu gaxanayaa **$5, hadii uu ku noqdo ganaaxu waxa uu noqonayaa $10).**

14.3 waa inuu leeyahay bulaacad ama shay udhigma oo nadiif ah oo uu biyaha waskhda ah ku aruursho inta laga jiidayo wasakhdaas, xaruntii aan lahay waxaa lagu ganaxayaa **$5, hadii uu ku noqdo ganaaxu waxa uu noqonayaa $10).**

## Qodobka 15aad

**Nadaafadda dukaamada ama suuqyaraha.**

15.1 Waa in uu u kala qeybsan yahay qaybo kala duwan sidaa qaybaha cunooyinka sh, sharaabka iyo qaybaha sida qalabka nadaafada iyo waxyaabaha asaasiga ah ee dadku kor ka adeegtaan, xaruntii laga helo waxaa lagu ganaxayaa **$5 hadii uu ku noqdo ganaaxu waxa uu noqonayaa $10.**

15. 2 Waa in ay leeyihiin talaagadaha wax qaboojiya ee bandhiga loogu tala galay in cuntada lagu guro iyadoo dadku ka adeegtaan xaruntii laga waayo ee cuno bisil gada waxaa lagu ganaxayaa $**5 hadii uu ku noqdo ganaaxu waxa uu noqonayaa $10).**

15.3 Waa in ay leedahay meelo lagu rido qashinka oo nidaamsan, mehradii aan lahayn waxaa lagu ganaxayaa **$5, hadii uu ku noqdo ganaaxu waxa uu noqonayaa $10).**

15.4 Marka lagu iibinaayo kalluunka subermaarkitka waa in meel gooni ah loogu talo gala welibana tallaagad qaboojisaana lagu ridaa, qofkii aan intaas samayn waxaa lagu ganaxayaa ganaax dhan **$5, hadii uu ku noqdo ganaaxu waxa uu noqonayaa $10).**

15.5 Waxaa Reebban in lagu iibiyo cunto iyo cabitaan taariikhdoodu dhacday, qofkii lagu qabto waxaa lagu ganaxayaa **$200, hadii uu ku noqdo ganaaxu waxa uu noqonayaa $400).**

## Qodobka 16aad

**Fayadhawrka wadooyinka, Togaga iyo Barxadaha.**

16.1 Waxaa reebban in dhamaan wadooyinka iyo barxadaha maagaladda lagu Shubo biyo wasakh lana dhigin qashin, qofki lagu qabto waxaa lagu ganaxayaa **$10, hadii uu ku noqdo ganaaxu waxa uu noqonayaa $20).**

16.2 Waxaa reeban in baabuurta lagu dhaqqo meel aan loo cayimin. gaarigii lagu qabto waxaa lagu ganaxayaa $**10, hadii uu ku noqdo ganaaxu waxa uu noqonayaa $20).**

16.3 labaajooyinka waa inay ilaaliyaan fayadharka goobta isla markaana ay biyaha wasakhda ah ku shubaan god loogu talo galay, labajadii qodobkaan baal marta waxaa lagu ganaxayaa **$10, hadii uu ku noqdo ganaaxu waxa uu noqonayaa $20).**

16.4 waxaa reeban in oliyada baabuurta lagaga badalo wadooyinka iyo meel aan munaasab ku ahayn, gaarigii lagu qabto waxaa lagu ganaxayaa $**30, hadii ku noqdo ganaaxu waxa uu noqonayaa $60.**

16.5 Waxaa reebban in dhamaan xaafadaha iyo dadwaynuhuba ay ku shubaan wasakh iyo qashin Togoga gudahooda (**Qodabkaan ganaaxiisu waa $5, hadii uu ku noqdo ganaaxu waxa uu noqonayaa $20).**

16.6 Waxaa reebban in warshadaha ay wasakh iyo dareeraha warshadaha ay ku qubaan Togoga gudahoda iyo dooxooyinka (**Qodabkaan ganaaxiisu waa $200, hadii uu ku noqdo ganaaxu waxa uu noqonayaa $300).**

16.7 Waxaa reebban in togoga magaalda lagu qubo qashin iyo wax kasta oo bilicda magaaladda wax u dhimaya qodobkaan ganaaxiisu waa $**35, hadii uu ku noqdo ganaaxu waxa uu noqonayaa $70).**

**17.8** Gaadiidka qaada hilibka hadii lagu arko iyagoo dhiig ama wax u dhigma oo ka dareeraya waxaa lagu ganaaxayaa $30 hadii uu ku noqdo ganaaxu waxa uu noqonayaa $60).

## Qodobka 18aad

**Kororka Ganaaxa.**

Waxaa Reebban in qof diido ganaaxa ama ku noqdo falkii lagu ganaaxay

**18.1 Ganaaxa Qodobkaan.**

B) Qofkii diida ganaaxa ku waajibay marka koowaad ganaaxu waa labanlaabmayaa, sidoo kale marka labaad iyo marka seddexaad (intii in le'eg mar walba).

T) Qofkii falkii lagu ganaaxay ku noqda mar kale sidoo kale wuu labanlaabmayaa ganaaxu.

J) Qofkii u hoggaansami waaya xeerkaan faya-dhowrka iyo caafimaadka bulshada oo diida ku dhaqanka qodobadiisa waxaa loo gudbinayaa hay'adaha sharciga ee Dawladda puntland ee soomaaliyeed.

**Qodobka 19aad.**

**Maareynta Musqulaha iyo Qashinka Daawooyinka.**

**B.** Booyadaha qaada bulaacadaha musqulaha wakhti kasta lama jiidi ka, isla mar ahaantaana waxaa loo astayay meelo ugaara cidii baal Marta ganaaxeedu waa $100 **hadii uu ku noqdo ganaaxu waxa uu noqonayaa $200).**

T. qof kasta oo qashinka dhigta meel aan loogu tala galin waxay mutaysanaysaa ganaax dhan **$5 hadii uu ku noqdo ganaaxu waxa uu noqonayaa $10).**

j. gaarigii qashinka dhiga meel aan loo astayn waxaa lagu ganaxayaa **$100, iyo qashinka oo uu guro, hadii uu ku noqdo waxaa lagu ganaxayaa $200, xarin iyo qashinka oo uu guro.**

**Dhaqan galka xeerkaan.**

X. Dumarka qashinka qaada oo dhiga meel aan ku haboonayn sida togaga iyo magaalada dhexdeeda waxa lagu ganaaxaaya $5

KH. Baabuurka qashinka qaada oo aan gayn goobaha loo cayimay waxa lagu ganaaxaaya qashinka oo uu guro iyo $ 100

D. farmashiga iyoo bakhaarka lagu qabto daawo ama badeeco dhacday waxa uu mutaysanaaya mulkiilaha oo la xiro iyo ganaax dhan $200

**Qodobka 19aad**

**Ganaaxyada dhulka iyo wadooyinka**

**1.1** Gaarigii (qofkii) ku jiida laamiyada biro dhaawacaaya laamiga waxa lagu ganaaxaya $ 50

1.2 Gaadiidkii lagu dhaqo meel aan loo astayn sida togaga , barxadaha , laamiyada , goobaha caafimadka iyo meelaha faras magaalada ah waxa lagu ganaaxaya $10

1.3 Qofkii god ka qoda laamiga hareerihiisa amar la ‘aan waxa lagu ganaaxaaya $ 50

1.4 Gaadiidka dhagaxa iyo niiska ka ganacsada hadii ay laamiga ku daadiyaan waxa lagu ganaaxaaya $20

1.6 Qofkii carro ama niis ku buuxiyo waddo amar la' aan waxa lagu ganaaxaaya in uu ka qaado waddada iyo ganaax lacageed $50

1.7 Gaarigii laamiga dushiisa olyo ku badala oo gaarsiiya laamiga waxa lagu ganaaxaaya laamiga oo uu hagaajiyo ganaax lacageed $ 30

1.8 sandaqad , balbalo, bulaacad iyo barkad laga dhiso goob aan sharci ahayn ,

Waxa la duminaaya dhismaha waxaaana laga qaadaya ganaax dhan $50

1.9 Baalaha ama boorka meel khaldan waa la saaraaya waxaana laga qaadaaya ganaax dhan $ 50

1.10 Tuubo ama cable la mariyey meel khaldan , waa la saaraaya ,waxaana laga qaadaaya ganaax dhan $100

1.11 Qofkii xira waddo sharci ah , waa la furaaya wadada waxaana laga qaadaaya ganaax dhan $ 50

1.12 Dhisme la dhiso degmada oo aan ogayn cashuurti iyo dhuljeexii oo laga qaado dibna loo cabbiro wixii khaldanaa la dumiyo iyo ganaax dhan $100

1.13 Qofkii jabiya layrka solarka waxaa laga qaadaya qiimihiisi iyo

ganaax dhan $100

1.14 Qofkii gooya geed magaalada ama banaankeeda ku yaala gooya , 10 geed oo uu beero iyo ganaax dhan $ 200

1.15 Qofkii fura waddo sharci darro ah waa la baabi' inaaya wadada waxana laga qaadaya ganaax dhan $ 200

1.15 Qofkii dhista tog ama meelaha biyo mareenka ah ,waxa laga duminaaya dhismaha waxaana laga qaadaaya ganaax dhan $200

1.16 Mooto bajaaj meel khaldan ka rakaabsata ama si khaldan usocota waxa lagu ganaaaxaaya lacag dhan $10

1.17  Guri kasta ee nasiib u helay  waddo laamiya , waxa waajib ku ah in uu ilaaliyo laamiga , oo  uu nadiifiyo kanaalka hortiisa mara ,qofkii aan furin kanaalka hortiisa mara waxa lagu ganaaxaaya  $ 10

1.18 Cidii jeexda laami iyada oo aan ogolaansho ka ahaysan maamulka degmada waxa lagu ganaaxaaya qiimaha laamiga inta la jeexay, laamiga oo sidii laga dhigo iyo ganaax dhan   $1000

1.19 Booyaha qaada qahinka dareeraha aha ee aan gayn goobaha loo asteeyey waxa lagu ganaaxaaya    $100

1.20 Riigii ka shaqeeya dhul aan sharci ama ogolaansho ka haysan maamulka degmada, waxa laga qaaadaaya dhuljeexi iyo ganaax dhan $1000

1.21: Cagaftii ka shaqaysa dhul aysan ogolaansho ah u haysan waxa lagu ganaaxaaya   $500

1.22  Qofkii laamiga ku shuba biyo wasakh ah waxa lagu ganaaxaaya    $10

1.23 Gaarigii la dhigo baakin aan ku haboonayn waxa lagu ganaaxaaya    $10

**Qodobka 20aad.**

1. Qofkii lagu qabto isagoo gadaya Bac nooc kast oo ay tahay waa gubid iyo ganaax lagu jaan gooyey sidaan hoos ku cad: -
   A. Bakhaarrkii lagu qabto kartoon waxa lagu ganaxaa $200.
   B. Gaarigii lagu qabto isagoo wadda bac, waxaa lagu ganaxayaa $ 100.
   C. Qofkii lagu qabto wax ka yar kartoon waa $10 iyo bacdoo la gubo.

2. Qofkii diida ganaax ku dhacay waxaa ganaxaas la wadayaa ilaa sadex jeer, hadii u qofku sameeyo amardiido marka afaraad waa la xirayaa iyo dhamaan ganaaxyadii oo uu bixiyo.

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa marka ay ansixiyaan golaha deegaanka degmada Qardho, isla Markaasna uu saxiixo guddoomiyaha Golaha Deegaanka.